



Xeerarka dugsiya xagaaga furan (Sommaröppet)

Inta lagu jiro isbuucyada 28-31, dugsiyada carruurta iyo xanaanada fasaxa ee caadiga ah waa la isku daraa. Xanaanada carruurta ee Vänerparken, 25, oo ku taal bartamaha magaalada waxay bixisaa daryeel carruur, iyo sidoo kale carruurta leh booska Dalsland, waxay heli doonaan boos xanaanada Brålanda usbuucyada 28-29 iyo xanaanada Frändefors usbuucyada 30-31. Xanaanada carruurta ee Holmängenskolan waxay bixisaa daryeel carruurta inta lagu guda jiro usbuucyada 28-31.

Carruurta waalidiintoodu shaqeeyaan ama waxbarashada ku guda jiraan inta lagu jiro usbuucyadan, waxay codsan karaan daryeel carruur. Xanaanada furan ee xagaaga, carruurtaada waxay la kulmi doonaan carruur iyo macalimiin ka yimid dugsiyo kala duwan. Qiimaha caadiga ah ee daryeelka carruurta ayaa lagu soo rogi doonaa.

Isu diiwaangelinta Sommaröppet

Yaa dalban kara boos hayn?

Mas'uulka caruurta laga bilaabo caruurta hal sanno jirka ee boos ka haysta dugsiya barbaarinta caruurta/hoyta xilliga firaaqada ayaa waxay ka dalban karaan daryeelka caruurta dugsiya xagaaga furan (sommaröppet), ilaa iyo inta loo baahan yahay ayadoo la eegayo shaqada ama waxbarashada waalidka. Haddii aad boos u baahan tahay todobaadyada 28-31 waxaa codsiga dayeelka xilliga xagaaga "Anmälan till sommarbarnomsorg" lagu buuxinayaa dhinaca internetka.

Diiwaangelin

Degmadda Vänersborg waxay bixisaa daryeel carruurta xanaanada furan ee xagaaga, iyadoo la raacayo shuruudda ah in "Diiwaangelinta daryeelka carruurta ee xagaaga" la soo diro, ugu dambeyntii 31ka May 2025.

Diiwaangelinta waxaa lagu xusaa magaca carruurta, booska caadiga ah, macluumaadka waalidka, iyo wixii macluumaad kale ee muhiim u ah xanaanada/fasaxa.

Si loo qorsheeyo hawlgalka, waa in sidoo kale la bixiyo jadwalka carruurta adoo adeegsanaya barnaamijka InfoMentor Hub.

Wargelinta boos celinta

Marka ilmuhu boos ka helaan dugsiya xanaanada/hoyga xilliga firaaqada ee sommaröppen waxaa loo dirayaa waalidiinta farriinta ogeysiinta

Barn- och utbildningsförvaltningen

Postadress

462 85 Vänersborg

Besöksadress

Hemsida

Sundsgatan 29

barnutbildning@vanersborg.se www.vanersborg.se

Telefon

0521-72 11 04

E-post

meeleynta. Farriinta waxaa ku qoran warbixin ku saabsan hawlaha xilliga xagaaga, qaybta ay ilmuhu boos ka heleen iyo warbixinta cinwaanka xiriirka ee ku saabsan waaxda.

Soo wargeli maamulka degmada ee meelaynta caruurta haddii baahidaada booska aysan weli jirin ama isbedeshay.

Jadwalka

Xilliga xaadirista ilmaha ee dugsiga xanaanada/hoyga xilliga firaaqada waxaa lagu diiwaangelinayaa ayadoo la isticmaalayo barnaamika InfoMentor Hub.

- Haddii waalidku uu shaqeeyo ama uu wax barto waxaa jadwalka la qorsheynayaa oo la gelinayaa ayadoo laga eegayo xilliga shaqada oo ay ku jirto xilliga nasashada.
- Haddii waalidku ku shaqeeyo si ku meelgaar waqti gaaban ah waxaa ayadana shaqeyneysa isla nadaamka qofka shaqeeya ama wax barta, jadwalka shaqadana waxaa laga eegayaa waqtiga shaqada oo ay ku jirto xilliga nasashada.

Maqnaanshaha iyo fasaxyada

Fasaxa jirrada iyo fasaxyada kale waxaa lagu wargelinayaa ayadoo la isticmaalayo aaladda InfoMentor Hub ama waxaa si toos loola xiriirayaa dugsiga xanaanada/hoyga xilliga firaaqada ee sommaröppna. Warbixinada cinwaanka dugsiga/hoyga xilliga firaaqada waxay ku qoran tahay warqadda fariinta meelaynta ee lasoo diro marka carruurta boos looga helo dugsiga. Caruurta xaq uma lahan iney joogaan dugsiga furan xilliga xagaaga(sommaröppna) marka mid ka mid ah waalidiintu uu fasax ku jiro ama fasax nooc kale haysto (sida shaqo waqti isbedbedelaya, ciidaha).

Hawlaha saacadaha shaqo aan habboonayn

Mas'uulka caruurta ee haysta daryeelka caruurta saacado shaqo aan habboonayn wuxuu isticmaalayaa isla dalabka elektarooniga ah.

Nala soo xiriir

Maamulaha meelaynta wuxuu fursad u haystaa inuu ka jawaabo su'aalihiina

Saacadaha telefoonka

Isniin – arbaco iyo jimce saacadda 10.00 - 12.00

Lambarka telefoonka: 0521-72 14 79

Cinwaanka elektarooniga: barnomsorg@vanersborg.se

Warbixintii ugu dambeysay ee ku saabsanayd xilliga hawlaha xagaaga , waxaad ka heleysaa bogga internetka ee degmada www.vanersborg.se.